

WAREEGTO L. 26 rep.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA MAAREEYAHA

MARKUU ARKAY Wareegtada Madaxweynaha Jamhuuriyadda 9kii duseembar 1952, n. 2357;

MARKUU ARKAY nadaamka dowerada kalkaaliyayaasha caafimaadka bulshada, oo lagu ansaxiyay d. a. n. 180 of rep. ee nobeembar 29, 1952;

IYADA OO LA TIXGELINAYO, waayo-aragnimada laga helay sannadki ugu horreeya ee hawlgalka dowerada darteed, in ay ku habboon tahay in la kordhiyo muddada dowerada laga dhigo min hal sano ilaa laba isla doweradda, si loogu oggolaado ardayda in si tartiib tartiib ah ay u dhexgalaan barashada maaddooyinka taas oo faa'iidooyin badan u leh;

WAXA LAGU TALIYEY, taa awgeed, in wax laga beddelo qodobbada 2 iyo 5 ee nidaamka la tilmaamay;

MARKUU DHAGEYSTAY Golaha Caafimaadka;

MARKUU DHAGEYSTAY sidoo kale guddiga maamulka, kaasoo kulankii 12kii janaayo 1954 ka bixiyay ra'yi wanaagsan oo ku saabsan arrintaan;

WUXUU XEEREYAY

Qod. 1

Qodobka 2 (faqrada koowaad) nadaamka dowerada loogu talagalay kalkaaliyayaasha caafimaadka bulshada, laguna ansaxiyay d. a. n. 180 of rep. nobeembar 29, 1952, ayaa wax laga beddelay sida soo socota:

“Dowerada kalkaaliyayaahsa Caafimaadka Bulshadu waa laba sannadle; waxa ayna bilaaban horraanta bisha janaayo kasta, waxa ayna dhammaan horraanta oktoobar kasta”.

Qod. 2

Qodobka 5aad ee ka mid ah nidaamka kor ku xusan ayaa wax laga beddelay sida soo socota: "Casharrada akhriska - 10 ilaa 12 usbuucii – waxa ay bixi doonaan sida badan galabnimada iyadoo loo eegayo jadwalka uu soo jeedin doono maamulaha dowerada oo uuna ansixiyo maamulka horumarinta bulshada".

Casharradu waxay xoogga saari doonaan maaddooyinka soo socda:

Sanadka 1aad

- a) walxaha xubnaha jirka, dhismaha jirka xoolaha iyo cudurrada;
- b) qaybaha faya dhowrka;
- c) Farsamada kalkaalinta, daryeelka iyo farsamada isbitaalka;
- d) fikradaha daawada bulshada;
- e) dhaqanka guud.

Sannadka 2aad

- a) la dagaallanka cudurada bulshada;
- b) cuntada iyo nafaqada;
- c) caawinta hooyada iyo gabdhaha;
- d) qaybaha nadaafadda;
- e) fikradaha daawada bulshada iyo dhaqanka guud.

Muqdisho, 22 maarso 1954.

Maareeye
Martino

Arkay diiwaan gelinta buug n. 3, warqadda n. 2.

Muqdisho, 15 abriile 1954.

Garsooraha xisaabaadka ama TAM.